

Astaamaha Kansarka

Somali



Waa muhiim in kansarka la ogaado goor hore. Marba marka ka horraysa ee la ogaado ayey ka badan tahay fursadda si fiican loogu dawayn karo cudurkaas. Sidaas awgeed waa muhiim in dhakhtar loo tago, marka la arko astaamo muujin kara kansar. Dhawrkan xaashiyood waxay tilmaamayaan astaamaha ugu muhiimsan ee kansarka, inkastuu calaamado kalena yeelan karo. Astaamaha halkan lagu xusay, waxay sidoo kale badi noqon karaan dar ay keeneen cudurro aan ahayn kansar, oo halkan wax lagaga xusi doono. Haddaba akhri oo ogow, markay tahay inaad dhakhtar u tagto ama sidoo kale aad caawiso cid qoyskaaga ah.

Det er vigtigt at opdage kræft tidligt. Jo tidligere kræft opdages, jo større er chancen for, at sygdommen kan behandles med et godt resultat. Derfor er det vigtigt at gå til læge, når man har symptomer, der kan tyde på kræft.

Denne pjecce beskriver de vigtigste symptomer, men der kan også være andre tegn på kræft. Symptomerne, der er nævnt i pjecen, er oftest tegn på andre sygdomme end kræft. Det fortæller pjecen også om. Læs den, så du ved, hvornår du skal gå til lægen – eller for f.eks. at hjælpe familien.



Nabar

Nabar soo baxa, iyadoon qofka wax ku dhicin, ayaa astaan u noqon kara kansarka, haddaanu dib u shiiqin. Kansarka maqaarka iyo ka afka ayaa u muuqan kara sidii nabar.

Baro iyo dhullax

Haddii baro ka soo yaacaan ama dhullax ka soo baxo jidhka ama muuq dooriyaan, waxay astaan u noqon karaan kansarka maqaarka.

Sår

Et sår, der opstår, uden at man er kommet til skade, kan være tegn på kræft, hvis det ikke forsvinder igen. Kræft i huden og i munden kan vise sig som sår.

Modermærker og vorter

Hvis et modermærke eller en vorte vokser eller ændrer udseende, kan det være tegn på hudkræft.



Guntin

Guntin baa calaamad u noqon karta kansarka. Xaaladaha qaarkoodna guntintu way damqanaysaa. Kansarka naasaha badi waxay haweenku isku arkaan guntin. Guntin ku samaysanta xiniin ayaa sidoo kale u muuqan karta kansar-xiniinyood, iyadoo aanay wehelin astaamo kale. Guntimaha ka soo baxa cunaha, kilinkillooyinka iyo qanjidh-sarceedka waxa sida caadiga ah keena xanuun. Kansarku wuxuu sidoo kale u muuqan karaa sidii guntin bararsan oo cunaha ka soo baxda.

4

Knude

En knude kan være tegn på kræft. Knuden kan i nogle tilfælde være øm. Brystkræft opdages ofte tilfældigt ved, at kvinden mærker en knude. En knude i testiklen kan vise sig at være testikelkræft, uden at der er andre mærkbare symptomer. Knuder på halsen, under armene og i lysken skyldes som regel betændelse. Kræft kan dog også vise sig som en hævet knude f.eks. på halsen.

Codka oo beddelma

Haddii muddo dheer qofku xabeepsanaado, ayaa astaan u noqon karta kansarka cunaha. Sidaas awgeed waa inuu qofka dhakhtar baadho. Waxaa kaloo badi xabeebta keena cudurro kale, sida, infakshan.

Qufac

Waa caadi in la qufaco, marka la hargabo ama sigaar la cabbo. Haddiise qufacu xumaado ama tegi waayo, waxay astaan u noqon kartaa kansarka sanbabada. Haddii qofku dhiig soo qufaco, waa inuu sida ugu dhakhso badan dhakhtar u tago.



Forandringer af stemmen

Hvis man er hæs i længere tid, kan det være symptom på kræft i halsen. Derfor skal man blive undersøgt hos sin læge. Tit skyldes hæsheden dog andre sygdomme f.eks. infektion.

Hoste

Det er helt normalt at hoste, når man er forkølet, eller hvis man ryger. Men hvis hosten ændrer sig eller ikke forsvinder kan det være tegn på lungekræft. Hvis man hoster blod op, skal man gå til læge så hurtigt som muligt.



6**Synkebesvær**

Vedvarende eller tiltagende synkebesvær kan være tegn på kræft i spiserøret, mavesækken, halsen eller i brysthulen. Synkebesvær skyldes dog i de fleste tilfælde andre sygdomme f.eks. halsbetændelse.

Liqitaanka oo adkaada

Liqitaanka oo qofka dhiba, siina adkaada ayaa calaamad u nooqn kara kansarka hunguriga, caloosha, cunaha, iyo xabadka. Adkaanshaha liqitaanka waxaa kaloo marar badan keena cudurro kale, sida, cunaxanuun.

Saxarada oo is gedgeddida

Haddii qofku, tusaale ahaan, mar shubmo, haddana calooshu is taagto ama saxaradu ka iman waydo, waxay astaan u noqon karaan kansarka xiidmaha. Sida badan waa iska caadi, in calooshu qofka fadhii-sato muddo yar. Waxyaabo kale ayaa sidoo kale caadi ahaan beddeli kara qaabka saxarada, sida, infakshan iyo cuntada la qaato.

Ændring af afføringsmønster

Hvis man f.eks. får skiftevis diaré og forstoppelse eller har svært ved at komme af med afføringen, kan det være symptom på kræft i tarmen. Det er dog meget almindeligt at have mavebesvær i kortere tid. Ændringer i afføringsmønsteret skyldes som regel andre forhold f.eks. infektioner og ændrede madvaner.



8

Blod i afføringen

Blod i afføringen eller blod på toiletpapiret efter toiletbesøg kan være tegn på kræft i tarmen. Andre sygdomme, hæmorider eller rifter i tarmen kan dog også give blod i afføringen.

Blod i urinen

Blod i urinen kan ses enten som tydeligt blod eller lidt rødfarvning af urinen, afhængigt af hvor meget det bløder. Blod i urinen kan være tegn på kræft i nyre eller blæren, men ses også ved blærebetændelse.

Saxarada oo dhiig soo raaco

Dhiig soo raaca saxarada ama lagu arko waraaqda la iskaga tiro, ayaa calaamad u noqon kara kansarka xiidmaha. Cudurro kale, dhaawac gaadha xiidmaha iyo babaasiirta ayaa badanaa sidoo kale keeni kara in saxaradu dhiig soo raaco.

Kaadida oo dhiig soo raaco

Dhiig sidiisii ah oo kaadida soo raaca ama midabkeeda oo yar casaada, oo ku xidhan hadba xaddiga dhiigga kaadida ku jira, ayaa calaamad u noqon kara kansarka kelyaha iyo kaadihaysta. Dhiigga soo raaca kaadida waxaa kaloo keeni kara xanuun ku dhacay kaadihaysta.

Saxaaxa oo dhiig ka yimaaddo

Dhiig cisagoynta dabadeed ka yimaadda saxaaxa (xubinta taranta ee dheddiga), ama cisagoynta horteed dhiigis aan caadi ahayn, ayaa astaan u noqon kara kansarka ilmagaleenka ama ilmagaleenka cudhiisa. Galmada oo qofka ka dhiiijisa ayaa sidoo kale calaamad u noqon karta kansarka cudha ilmagaleenka. Dhiigga aan caadiga ahayn ee cisagoynta horteed, waxaa kaloo keeni kara khal-khal ku dhaca hoormoonnada jidhka.

Blødning fra skeden

Blødning fra skeden efter overgangsalder eller uregelmæssig blødning før overgangsalder kan være tegn på kræft i livmoderen eller livmoderhalsen. Blødning ved samleje kan også være tegn på livmoderhalskræft. Uregelmæssig blødning før overgangsalder kan også skyldes hormonforstyrrelser.



Xanuunno

Xanuunno qofka, tusaale ahaan, laga qabto caloosaha ayaa astaan u noqon kara kansarka. Waxaa kaloo xanuunnadaa keeni kara sababo badan oo kala duwan. Dhif ayey xanuunnadu keligood, astaan u noqdaan kansarka.

Astaamo kale

Xummad, daal, nafsad la'aan iyo dawakhaad qofka wiigag badan haysa, ayaa keligood astaan u noqon kara cudurka kansarka. Cudurro badan oo kale ayaa caadi ahaan astaamahan leh, hase yeeshee waxaa habboon in dhakhtar loo tago, hadday wiigag badan qofka hayaan.

10

Smerter

Smerter f.eks. i maven kan være symptom på kræft. Men der kan være mange forskellige årsager til smerter, og smerter er sjældent det eneste tegn på kræft.

Almene symptomer

Feber, træthed, manglende appetit eller svimmelhed i flere uger kan være de eneste symptomer på en kræftsygdom. Disse symptomer er helt almindelige ved mange andre sygdomme, men hvis de varer ved i flere uger, bør man gå til lægen.

Dhakhtar u tag haddaad isku aragto:

- Nabar maqaarka ama afka ka soo baxa, oo bil gudaheed ku bogsan waaya.
- Baro ka soo yaaca ama dhullax ka soo baxa jidhka oo muuq dooriya.
- Guntin ku samaysanta naaska, xiniinyaha ama meelo kale oo jidhka ah.
- Qufac ama xabeeb ku tegi waaya bil gudaheed.
- Dhiig candhuufta soo raaca.
- Liqitaanka cuntada oo ku dhiba, ama kugu sii adkaata muddo bil ka badan.
- Saxaradoo is gedgeddida, oo mar aad shubanto marna calooshu iskaa taagto in bil ka badan.
- Saxarada oo dhiig soo raaco.
- Kaadida oo dhiig soo raaco, ama ay dhib noqoto inay ka soo dhammaato kaadihaysta.
- Dhiig cisagoynta dabadeed ka yimaadda saxaaxa, ama dhiigis aan caadi ahayn oo cisagoynta horteed ah.
- Xanuuno aan sababtooda la garanayn.
- Xummad, daal, nafsad la'aan iyo dawakhaad dhawr wiig ah, ama miisaanka oo hoos u dhaca, iyadoon la garanayn sababta.

Gå til lægen hvis du har:

- sår på huden eller i munden, som ikke heler inden for en måned
- modermærker eller vorter, der vokser eller ændrer udseende
- en knude i brystet, i testiklerne eller andre steder på kroppen
- hoste eller hæshed, der ikke aftager inden for en måned
- blodigt opspyt
- tiltagende eller vedvarende synkebesvær i mere end en måned
- ændret afføringsmønster, f.eks. skiftevis diaré og forstoppelse i mere end en måned
- blod i afføringen
- blod i urinen eller får besvær med at tømme blæren
- blødning fra skeden efter overgangsalderen eller uregelmæssig blødning før overgangsalder
- uforklarlige smerter
- feber, træthed, appetitløshed eller er svimmel i flere uger eller har uforklarligt vægttab

Forebyggelsesafdelingen august 2007

Oversætter: Ahmed Diria Liban

Tegner: Rina Dahlerup

Layout: Rumfang

Tryk: XXXX

ISBN: 987-87-91277-82-5

Kræftens Bekæmpelse

Strandboulevarden 49

2100 København Ø

Telefon 35 25 75 00

www.cancer.dk

www.cancer.dk/international

